## Sahanka Ardayda Dugsiyada Guuleysta Lagu Soo Ururinayo iyo Warcelinta Qoyska

Sanad kasta, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ururiyaan warcalinta ku saabsan jawiga waxbarasho iyo dhaqan ee ardayda, qoysaska, iyo shaqaalaha iyada oo addeegsanayo **Sahanka Dugsiyada Guuleysta**. Natiijooyinka ka soo baxa sahankani wuxuu naga caawiyaa sidii aan u fahmi lahayn baahiyaha bulshadayada ee dugsi kasta iyo guud ahaan dugsiyada degmada. Waxaan xogtan u isticmaalaan sidii aad uga bixin lahayn jawaab celin iyo in la tababaro hoggaamiyaasha iyo shaqaalaha sidii aan dugsiyadeena uga abuuri lahayn jawi caafimaad qaba oo dhammaan soo dhaweeya.

Dhammaan dadka ka qeybqaadanaya sahanka online-ka waxay ku dhammeynaysaa qiyaastii 15 ilaa 30 daqiiqo.

- **Qoysaska** waxay ka heli karaan linkiga sahanka boggani marka ay sahanku furan yahay ee la qaadan karo. Qoysaska sidoo kale waxay ka heli doonaan macluumaadka ay dugsiyadu u soo diraan. Sahanka linkiga qoyska waxaa dib loo cusbooneysiiyaa sanad kasta iyada oo la heli karo marka uu furan yahay sahanku.
    - Qoysasku waxay warcelin ka bixiyaan ku saabsan soda ay u arkaan waxbarashada la siiyo ubadkooda, caqabadaha hor taagan inay ka qeybqaataan, nabadgelyada dugsiga, jawiga dugsiga, xiriirka qoyska dugsiga, iyo ku habboonaanta dugsiga.
    - Sahanka qoyska waxaa lagu heli karaa luqadaha kala ah Ingiriisi, Isbaanish, Ruush, Soomaali, Fiitnaamiis, iyo Shiino.

- **Ardaydu** waxay ka qeybqaataan sahanka inta lagu gudo jiro intay ku sugan yihiin maalintii dugsiga. Sahanka waxaa ilaaliya si aan loo qishin macallinka fasalka ama macallin kale oo ka mid ah macallimiinta dugsiga.
    - Ardaydu waxay ka jawaabi su'aalaha ku saabsan waxbarashada ay dugsiga ku qaataan sida ay u arkaan, kala duwanaanshaha ardayda iyo in ardaya waliba qeyb ka yahay dugsiga, nabadgelyada dugsiga, xidhiidhka ardayda, xidhiidhka macallinka-ardayda, sida ay u guuleysan karaan ardaydu barashada Luqada Ingiriisida iyo xisaabta, ka qeybqaadasahada ardayda,ku baraarugsanaanta dhaqanka iyo ka ficil qaadashada, jawiga dugsiga, iyo dareenka inay ardaydu dugsiga ka mid yihiin.

### Taariikhaha Sahanka

Noofamber 3 to Diisembar 10, 2025

### Ka Qaado Sahanka Halkan

[2025-26 Sahanka Dugsiyada Guuleysta (Linkiga Qoysaska)]

### Ka Fiiri Natiijooyinka

[2024-25 Natiijooyinka Sahanka Dugsiyada Guuleysa]

### Su'aalo?

**Email:** research@pps.net

    - Sahanka ardayda waxaa lagu helayaa luqadaha kala ah, Ingiriisi, Isbaanish, Ruush, Soomaali, Fiitnaamiis, iyo Shiine.

- **Shaqaalaha iyo hoggaamiyaasha dugsiga** waxay ka helayaan linkiga aragtidooda ku saabsan sahanka iyada loo marinayo cinwaankooda email-ka ee PPS. Shaqaalaha iyo hoggaamiyaashu waxay sahanka qaadanayaan inta lagu gudo jiro kulanada shaqaalaha ee la mudeeyey.
    - Macallimiinta iyo shaqaalaha aan dugsiga wax ka dhigin waxay aragtidoodu ku saabsan waxbarashada, sida wax loo barayao dhammaan ardayda, barashada shucuurta iyo bulshada, ardayda iyo koritaanka maskaxda shaqaalaha, xidhiidhka ka dhexeeya hoggaanka iyo shaqaalaha, xidhiidhka ka dhexeeya shaqaalaha iyo qoyska, nabadgelyada dugsiga, jawiga dugsiga, daalka iyo haynta shaqaalaha, ku dhacooda, iyo xidhiidhka shaqaalaha.
    - Hoggaamiyaashu waxay ka jawaabi su'aalaha ku saabsan sida ay u arkaan waxbarashasda, xidhiidhka shaqaalaha- qoyska, jawiga dugsiga, hoggaaminta dugsiyada degmada, ka qeybqaadashada shaqaalaha, guud ahaan ka qeybqaadashada dugsiyada degmada, iyo tallo-bixinta, xidhiidhka hoggaanka dugsiyada degmada, iyo barashada xirfadda.